

## Barnaamijka Deeqaha Deegaanka ee Koofurta King County

**<Isqor si aad u hesho maclumaadka sanduuqa deegda Koofurta King County oo aad wax uga barato fursadaha kale ee deeqaha>**

### **Waa maxay Sanduuqa Koonfurta King County?**

Dekedda Seattle waxay aasaastay Sanduuqa Deeqda Koonfurta King County (SKCF) Sannadku markuu ahaa 2019 si loo horumariyo iskaashiga ku saleysan sinnaan iyo in la siiyo ilaha lana taageerada bulshooyinka ka agdhow garoonka diyaaradaha ee taariikh ahaan aan heli adega ay u bahnayeen. Sanduuqa waxuu bixinaya \$10 milyan inta u dhexeysa 2019 iyo 2023 si wax looga qabto yareynta buuqa, caafimaadka deegaanka iyo joogtaynta bulshooyinkan isir ahaan iyo dhaqan ahaanba kala duwan. Wareeggii ugu horreeyay ee Sanduuqa, wuxuu diiradda saaray dib u soo kabashada dhaqaalaha, waxaa la bilaabay Ogosto 2020.

### **Deeqaha Deegaanka**

Barnaamijka Deeqaha Koofurta King County (SKCF) waa wareeg cusub oo ka mid ah Sanduuqa deeqda Koofurta King County oo taageeraya mashriicda lagu hagaajinayo deegaanka u dhow garoonka diyaaradaha ee magalooyinka ah: Burien, Des Moines, Federal Way, Normandy Park, SeaTac, iyo Tukwila. Kooxaha ay hogaaminayaan bulshada iyo kuwa aan macaash doonka ahayn waxaa lagu casumaya in ay codsadaan maalgelin lagu taageerayo howlahan ah:

- hagaajinta meelaha dadweynaha (oo ay ku jiraan jardiinooyinka, garoomada lagu ciyaaro ee dugsiga, fagaaraha dadweynaha ama gobta dekeda ku dhow)
- qalab ama farshaxan sameyn
- ama xaafadaha ama mashaariicda ilaalinta deegaanka.

Barnaamijka Deeqaha Bey'adda ee loo yaqaan 'SKCF Environmental Grant Program'. Barnaamijkan cusub wuxuu fidinaya si loo garsiyo in ay guleystaan bulshada degaan agaarka madaarka. Bulshooyinka Koofurta King County ee khibrada u leh isu dheelitir laanta bulshooyinka ay waxyeeladu ka soo gaartay bey'adda iyo dhaqammada isticmaalka dhulka oo aan loo sinnayn iyo barakac dhaqaale oo u riixay beelaha la faquuqo in la fogeeyo oo loo sii fogeeyo koofurta. Saameynta caafimaad iyo dhaqaaleed iyo COVID-19 oo dheeri u ah dadka dakhligoodu hooseeyo iyo bulshooyinka midabka leh, waxaana jira baahi ka xoog badan sidii hore abid oo loo baahanyahay in la maalgaliyo Koofurta County County, halkaas oo deggeneyaashu ay fursadoodu yar tahay in ay jardiinooyinka iyo meelaha cagaaran isticmalaan marka loo eego dadka kale ee Kawntiga ku nool.

### **Wareegii ugu horreeyay ee Barnaamijka Deeqaha Koofurta King County ee Deyrta 2020:**

Dekeddu waxay hadda aqbaleysa soo-jeedin ku saabsan wareegga ugu horeeya ee Deeqaha Deegaanka Koonfurta King County. Soo-jeedinta waa in la soo gudbiyaa 12:00 pm. Diisambar 4, 2020. Deeqaha la bixinayo waxay gaarayaan illaa \$20,000 waana in ay dal-badyaashu la yimadaan sedex melood meel 3: 1 (hoos ka eeg faahfaahinta).

### **Tilmaamaha sanduuqa**

- \$ 435,000 oo maaliyad ah ayaa la heli karaa wareeggan.
- Waxaa la soo codsan karaa ugu badnaa ilaa \$ 20,000.
- Mashruucyadu waa in laga sameya meel ay dadweynahu leeyahiin.
- Mashruucyadu waa inay muujiyaan oo la yimadaan sedex melood meel 3: 1 dhaqaalaha, oo macnaheedu yahay doolar kasta oo ay bixiso dekeddu waa inuu u dhigmaa saddex doolar oo ah qimaha mashruuca ee kaalmo qaatahu ama mashruucyada jaalka la ah/ama la shaqeeya. Dekeddu waxay ogoshahay dhowr dariiqo oo lagu sameyn karo is dhignaansha oo ay ku jiraan waqtiga tabaruca, ka qaybgalka howlaha dadweynaha, saacadaha qofku shaqada qabtay, qimaha deegaanka ee geedo beerida, dhimista kaarboonka qiiqa, tabarucaadka nooca ah, tabarucayaasha la-hawlgalayaasha mashruuca, iyo lacag caddaan ah.
- Soo-jeediyaashu waa inay ahaadaan urur aan macaash doon ahayn oo leh 501 (c) 3 ama 501 (c) 6 xaadal ama koox bulsho ah oo lashaqeysa 501 (c) 3 kafaala qaade maaliyadeed.
- Ururradu waa inay soo bandhigaan khibrad ay ugu adeegayaan bulshooyinka ku dhow madaarka ee la soo dersa caddaalad darrada dhaqaale iyo bey'adeed.
- Ururradu waa inay ku soo gudbiyaan soojeedinta qoraal kana qayb galaan munaqashada lala yeelanyo gudiga dib u eegista.

### **Sida loo codsado**

- Waxey ku yalnaan dhammaan qalabka loogu talagalay barnaamijka Deeqaha Deeganka ee Koofurta King County 'SKCF' tabka 'Documents' ee ku yaal barta [VendorConnect](#). Waa inaad iska diiwaangelisaa sidii Holder Plan ee VendorConnect si aad u weydiiso su'aalo una hesho akhbaaraha cusub. Isdiiwaangeli adiga oo aadaya bogga Guudmarka Xallinta codsiga Sanduuqa Koofuta King County. (Tilmaamaha faahfaahsan ee ku saabsan diiwaangelinta, akhri Hagaha Adeegyada Dibadda ee VendorConnect.) Si aad su'aal u weydiiso, xulo badhanka "Weydii Su'aal".

### **Faahfaahinta soo gudbinta iyo waqtiga kama dambaysta ah**

- Dhammaan dukumiintiyada loo baahan yahay waa in lagu soo diraa emayl ahaan [e-submittals-sa@portseattle.org](mailto:e-submittals-sa@portseattle.org).
- Waqtiga kama dambaysta ah ee la soo gudbinayo soo jeedinta waa 12:00 pm. Diseembar 4, 2020.

### **Macluumaadka kulamada**

Ka soo qaybgal mid ka mid ah kal-fadhiyadayada 'muqaalka' si aad wax badan uga ogaato habka soo-jeedinta. Inta lagu jiro kulanka macluumaad bixinta, codsadaayaashu waxay heli karaan caawimaad farsamo oo loogu talagalay isticmaalka VendorConnect ama waydiinta su'aalo laxiriira soo jeedinta iyo nidaamka gudbinta. Tarjumaadda luqadda ayaa la heli karaa markii la codsado. Fadlan xajiso RSVP adoo adeegsanaya xiriiriyeysa hoose. (Ha ku sameyn xajiso RSVP nidaamka VendorConnect.)

<https://www.portseattle.org/programs/south-king-county-fund-environmental-grants-program>.

**Tusaalooyinka mashaariicda ay hore u maalgelisay ee Bey'addah Bulshada Ee Madaarka  
Airport Community Ecology (ACE)**

**Midway Park & Play Area Restoration** – [Des Moines Rotary Foundation](#), Des Moines. Deeqdani waxay bixisa lacag u oggolaanaysa mutadawiciinta in ay dayactiraan oo ay dayactiraan qalabka jardinooyinka si kor loogu qaado bilicda iyo qiimaha madaddaalada ee jardiinka si dhallinyarada iyo qoysasku ugu raaxaystaan.

**Farmbot** - Ecotech ee ku yaal Beer Magaalada ah, Key Tech Labs, Des Moines. Mashruucani wuxuu isku daraa STEM (Sayniska, Teknolojiyada, Injineerinka, iyo Xisaabta) iyo waxbarashada cuntada caafimaadka leh iyada oo la barayo dhalinyarada sida loo dhiso robot u janjeera beerta bulshada ee ku taal deegaanka Des Moines oo ay ku sareyso saboolnimada nawaxiga Pacific Ridge.

**New Futures Farm-** [Southwest Youth and Family Services](#), ee Burien iyo SeaTac. Mashruucani wuxuu bixiyaa waxbarasho cunno caafimaad leh iyadoo qoysaska la barayo sida loo dhiso loona ilaaliyo beerta bulshada ee meelaha dakhligoodu hooseeyo ee Burien iyo SeaTac

**SeaTac Ethnic Community Ecology Connections** – [Partner in Employment](#), [SeaTac](#). Deeqda ayaa bixin doonta hawlgal la xiriira dhaqanka khuseeya bulshada qaxootiga iyo muhaajiriinta ee SeaTac si loo dhiirrigeliyo waxbarashada deegaanka, loo abaabulo munaasabadaha nadaafadda bulshada, iyo in la kordhiyo awoodda ganacsiyada yaryar si ay ugu tababbartaan joogtaynta deegaanka.

### Ka eego liiska mashruuca oo dhan

#### **Su'aalo?**

- Gal VendorConnect ama kaqeyb gal fadhiga si aad su'aalo u weydiiso. Jawaabaha dhammaan Qorshaha Maalgelinta ee Koonfurta King County waxaa lagu soo badhigi donaa VendorConnect. Wuxaad ka daawan kartaa [VendorConnect Guide User External](#) halkan si ay kaaga caawiso diiwaangelinta ama aad u timaaddo fadhiga lagu bixinayo kaalmada farsamo.
- Wuxaad sidoo kale ka eegi kartaa su'aalaha sida isku xigxiga la isu weydiyo wixii ku saabsan shuruudaha maaliyadeed.

#### Afeef

Afeef: Tani ma aha goobta wax soo iibsiga rasmiga ee Dekedda. Maclumaadka rasmiga ah ee dalabka RFP iyo shuruudaha ugu badan ee maclumaadka waxaa lagu diyaariyay nidaamka VendorConnect ee dekeda (Port).